

# FAYRUSTA KORONADU MA U KALA GUDUBTA ARDAYDA JOOGTA ISKUULKA?

*Ku socota ardayda fasallada 5-aad ilaa 7-aad. Way fiican tahay haddii lala akhristo waalidka.*

## MACLUUMAAD KU SAABSAN DARAASADDA CILMIYEED

Fayrusta koroonadu waxay ku faaftay dunida oo dhan, xataa Noorway. Waxannu rabnaa in aannu samayno daraasad ku saabsan fayrustan iyo sida la isku qaadsiiyo.

Fayrustu waa abuur aad u yaryar oo la arki karo keliya haddii la isticmaalo mikoroskoob. Fayrusta koroonada waxaynu qaadnaa marka uu qof qaba uu qufaco ama hindhiso. Waxa iyana fayrusta la qaadi karaa haddii la taabto meel lagu qufacay ama lagu hindhisay oo kadibna la taabano wejiga. Taas darteed waxa muhiim ah in inta badan la dhaqo gacmaha.

Carruurta qaaday fayrusta waxa ku dhici kara qufac, cunaha oo xanuuna, qandho ama caloosha oo xanuunta, qaarkoodna waxba ma dareemaan. Carruurta intooda badan si dhakhso ah ayey u caafimaadaan. S kastaba, si looga hortago in dadka kale ka sii qaadaan waxa qofka loo sheegaa inuu joogo guriga in muddo ah kadib marka laga helo fayrusta koroonada.

Qaabka jidhku isaga difaaco fayrusta waxa loo yaqaanaa difaaca jidhka. Difaaca jidhku waxa uu ka koobanyahay unugyo iyo maadooyin lid ah oo la dagaalamaya fayrusta. Madooyinka lidka ah waxa laga cabiri karaa tijaabo dhiig ah ama candhuufta. Maadooyinka lidka ah waxay kaa caawin karaan inaad caafimaado isla markaana waxay keeni karaan inaad mar labaad ku bukoonin isla fayrusta.

Fayrusta koroonada waxa la isu qaadsiiyaa si fudud. Si looga hortago in dad badan qaadaan fayrusta koroonada iyagoo jooga iskuulka, waa in qof kasta gacmaha dhaqo marar badan isla markaana waxa dhici karta in ardayda loo qaybiyo kooxo joogto ah.

Waxannu rabnaa in aannu aqoon dheeraad ah u yeelano qaabka fayrusta koroonada isu qaadsiiyaan carruurta iyo dadka waaweyn ee jooga iskuulka. Waxa aannu daraasad-cilmiyeed ku samayn doonaa:

- Imisa qof ayaa qaadaysa fayrusta haddii hal arday oo ka mid ah fasalku qaado fayrusta koroonada?
- Imisa ka mid ah dadka qaaday fayrusta koroonada ayaa bukoon doona?
- Eegista in fayrusta koroonada laga helo candhuuftaada.
- Eegista in maadooyinka lidka ku ah fayrusta koroonada laga helo candhuuftaada.
- Baadhitaanno gaar ah oo lagu eegayo in fayrus koroonada ah oo isku mid ah laga helo dhammaan dadka qaaday.

## WAA MAXAYA SABABTA ANIGA LA II WEYDIINAYO INAAD KA QAYBGALO?

Ma rabtaa inaad naga caawiso in aannu ogaano in fayrusta koroonadu ku faafayso iskuulkaaga? Waxa lagu weydiinayaa inaad ka qaybgasho waayo fayrusta koroonada ayaa laga helay adiga ama qof aada iskuulkaaga. Qaar badan oo ka mid ah ardayda kale ayaa iyana la weydiinayaa inay ka qaybgalaan. Dhakhtar jooga degmada aad ku nooshahay ayaa na soo ogeysiyeey in qof iskuulka kula dhigta uu ku dhacay cudurka Karoonada.

**MAXAAN SAMAYNAYAA HADDII AAN KA QAYBGALO?**

Haddii aad ka qaybgasho, waxannu kaa codsan doonnaa inaad candhuuf ku tufto tuubo gaar ah oo aanu kuu dhiibi doonno. Waxannu rabnaa laba tijaabo oo candhuuf ah oo lagaa qaaday labo maalmo oo kala duwan. Dadka waaweyn ee jooga guriga ayaa loo sheegi doonaa qaabka aad u qadayso tijaabada si ay kuu caawiyaan. Tijaabada waxaad ku qaadaysaa guriga, mana laha wax xanuun ah. Mid ka mid masuuliyiinta darsaadda ayaa tijaabada ka soo dooni doona gurigiina ama meel u dhow iskuulkaaga. Sida kalena waxannu rabnaa in adiga ama waalidkaagu ka jawaabtaan su'aalo aannu samaynay. Su'aaluhu waxay ku yaalaan warqad ama ku jiraan internetka. Waxannu ku weydiin doonnaa inaad bukto iyo inaad tusaale ahaan qufacayso ama qabto qandho.

**ANIGA AYAA DOORANAYA INAAN KA QAYBGALO IYO IN KALE**

La hadal dadka waaweyn ee jooga guriga. Adiga iyo waalidkaaga ayaa isla go'aamin kara inaad ka qaybgashaan daraasadda iyo in kale. Dhibaato ma leh haddii aanad rabin inaad ka qaybgasho. Waalidkaaga ayaa Machadka Caafimaadka Dadweynaha u sheegi doonnaa inaad ka qaybgalayso iyo in kale.